XASHIISH IYO CANUGAADA

Abriil 9, 2015

Xashiishka hadeer sharci ayuu u yahay dadka ka weyn 21. Laakin micnaheeda ma ahan in uu badbaado u yahay uurleyda ama hooyooyinka naaska-nuujiyo iyo ilmaha.

Lama ogo tirada badbaadada u ah isticmaalka xashiishka inta lagu jiro uurka.

Waa in aadan isticmaalin xashiishka marka aad uur tahay, sida aheyd in aadan u isticmaalin qamriga iyo tubaakada.

Tetrahydrocannabinol (THC) waa kiimikada ku jirto xashiishka oo ku "marqaansiiso."

Isticmaalka xashiishka adigoo uur ah wuxuu ugudbiyaa canugaada THC.

OGOW XAQIIQDA

XASHIISHKA IYO UUURKA

Isticmaalka xashiiska adigoo uur ah laga yaabo in ay canugaada wax yeeleyso. Xashiiska u gudbo canugaada xiliga lagu jiro uurka laga yaabo in ay ku adkeyso canugaada in uu fiiro gaar ah yeesho iyo barashada, gaar ahaan isagoo sii koraayo canugaada. Tani waxay ku adkeyneysaa in canugaada uu dugsiga ku wanaagsanaado.

Isbitaalada qaarkood waxay ka baaraan carruurta dhalashada ka dib darooga. Hadii canugaada laga helo THC dhalashada, sharciga Colorado wuxuu leeyahay adeegyada badbaadada carruurta waa in la ogeysiiyaa. Kala hadal dhaqtarkaaga xili hore oo uurkaaga ah wixii isticmaalka xashiishka ah.

XASHIISHKA IYO NAASNUUJINTA

Machadka Mareykanka ee Cudurada-carruurta wuxuu yiri in hooyooyinka naaska-nuujinayo waa in aysan isticmaalin xashiishka.

Naasnuujinta wuxuu u leeyahay faa'idooyin caafimaad badan oo labadoodaba ah canuga iyo hooyada. Laakin THC kujira xashiishka wuxuu galaa caanaha naasaha iyo laga yaabo in uu saameeyo canugaada.

Sababtoo ah THC wuxuu ku keydsamaa dufanta jirka, jirkaaga ayuu ku haraa waqti dheer. Maskaxda canuga iyo jirka waxay ka sameysanyihiin wax badan oo dufan ah. Maadaama maskaxda canugaada iyo jirka uu keydinayo THC waqti dheer, waa in aadan isticmaalin xashiishka xiliga aad uurka tahay ama aad naaska nuujineysid.

Caanaha naasaha waxay sidoo kale wataan dufan badan. Tani waxay la mid tahay in "lismada iyo riixitaanka" caanaha naaskaaga laga yaabo in aysan u shaqeynin isku midka sida qamriga uu sameeyo. Qamriga maku keydsano dufanta, si markaas uga dhigo jirkaaga mid kacsan.

QIIQA XASHIISHKA MA U DARANYAHAY CANUGEYGA?

Haa. Neefsiga qiiqa xashiishka waa kuu daranyahay adiga iyo canugaada. Qiiqa xashiishka wuxuu leeyahay kiimiko isku mid ah sida qiiqa tubaakada. Qaar ka mid ah kiimikooyinkaan waxay sababi karaan kansar. Ha u ogolaanin in qofna uu ku cabo gurigaada ama canugaada dhiniciisa.

KA WARAN HADDAAN XASHIISKA ISTICMAALO ANIGOON CABIN?

THC nooc walba ah ee ku jiro xashiishka laga yaabo in ay u darantahay canugaada. Dadka qaarkii waxay u maleeyaan isticmaalka qalinka tubada ama cunista xashiishka (sida buskudka ama doolshada) in ay badbaado ka tahay cabitaanka. Xitaa inkastoo noocyadaan aysan laheyn waxyeelo buuxda oo cabida ah, weli waxay wataan THC.

SIDEE AYAAN SI BADBAADO AH U KEYDIN KARAA XASHIISHKA?

Ku keydi dhammaan alaabaha xashiishka goob xeran. Hubi in carruurtaada aysan arki karin ama gaari karin goobta xeran. Ku haay xashiiska kartoon adag oo carruurta aysan furi karin ee dukaanka laga helo.

MAXAA DHACO HADII CANUGEYGA SI LAMA FILLAAN AH UU U CUNO AMA U CABO XASHIISH?

Xashiiska aad ayuu u xanuunsiin karaa carruurta. Dhibaato ayuu raadiyaa oo socod ah ama fadhiya, wuxuu bilaabayaa hurdo ama neefsiga ku adkaaneysaa.

Hadii aad walaacsantahay, u yeer qadka xakameynta sunta sida ugu dhaqsiha badan oo suurtagalka ah. Wicitaanka waa bilaash iyo si dhaqso ah ayaa laguu caawinayaa: **1-800-222-1222.**

Hadii xanuuno ay daranyihiin, soo wac 911 ama booqo qolka xaaladaha degdega.

MAXAA KALE AYAAN KU OGAANAYAA IN AAN CANUGEYGA BADBAADO KU HAAYO?

Marqaansanaanta ama sarqada adigoo sameynayo howlo waxay noqon kartaa halis.

Marqaansanaanta adigoo canug daryeelayo badbaado ma ahan. Ha u ogolaanin qof marqaansan in uu canugaada daryeelo.

Xashiishka qaarkii wuxuu ka dhigi karaa dadka hurdo sareyso marka ay marqaansanyihiin. Xashiishka wuxuu ku gelin karaa hurdo adag. Badbaado uma ahan canugaada in uu adiga kula seexdo, gaar ahaan hadii aad marqaansantahay.

Hadii aad qorsheyso in aad isticmaasho xashiish, hubi in uu jiro qof kale oo si badbaado ah kuugu daryeeli karo canugaada.

Badbaado ma ahan gaari kaxeynta adigoo marqaansan. Ha ogolaanin in canugaaga gaariga raaco hadii darawalka marqaansanyahay.

SHEEKOOYINKA KU SAABSAN XASHIISHKA

SHEEKADA: Xashiishka waa badbaado isticmaalkiisa markaa uurka la yahay ama la naasnuujinayo.

XAQIIQDA: Ma cuni kartid ama ma isticmaali kartid cuntooyinka qaarkood iyo daawooyin markaad uur tahay ama aad naasnuujineysid. Tani waa sababtoo ah waxaa laga yaabaa in ay waxyeeleeyaan canuga. Kan waxaa ku jira xashiishka.

SHEEKADA: Maa daamaa uu sharciyeysanyahay, waa in uu badbaada ahaadaa.
XAQIIQDA: Isticmaalka xashiishka xiliga lagu jiro uurka laga yaabo in uu waxyeelo canugaada, sida qamriga ama tubaakada. Sharciyeysnaanta ma ka dhigto badbaado.

SHEEKADA: Maa daamaa uu dabiici yahay, waa in uu badbaada ahaadaa.
XAQIIQDA: Ma ahan in maan dooriyaha oo dhan ama dhirta ay badbaado yihiin. Tubaakada ama miraha sunta ah ayaa tusaalooyin weyn ah. Xashiishka wuxuu wataa THC, oo laga yaabo in ay waxyeesho canugaada.

SHEEKADA: Maadaama dadka qaarkii ay u isticmaalaan xashiishka sida daawo, waa in uu badbaado ahaadaa.
XAQIIQDA: Xashiishka waxaa ku talin karo dhaqtarka iyadoo ay jirto dacwada gaar ah. Dhaqtarka ayaa go'aansado hadii faa'iddoyinka ay kaweyn yihiin halisaha. Badbaado ma ahan in la siticmaalo daawooyinka adigoo uur ah ama naasnuujinayo oo aan dhaqtarka ku talin. Kan waxaa ku jira xashiishka. Kala hadal dhaqtarkaaga dooqyada badbaadada ah oo aan waxyeelin canugaada.

Warbixinta oo dhan oo saameynada caafimaadka ah ee xashiishka waxay ka timid Walaacyada Caafimaadka Kormeerida La xiriiro Xashiishka Colorado: Wargelinta 2014.

BOOQO: colorado.gov/pacific/cdphe/retail-marijuana-public-health-advisory-committee

CDPHE CO
COLORADO
Department of Public Health & Environment